





# LIDA Stories

[lidastories.net](http://lidastories.net)

## Imaanshaha Norway / Coming to

### Norway

 Aamiina


 Julie Cornelia van Walsum


 Mohamed Abdirashid (so)





This work is licensed under a Creative Commons Attribution 4.0 International License.  
<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>

## Imaanshaha Norway Coming to Norway



 Aamiina

 Julie Cornelia van Walsum

 Mohamed Abdirashid

5

 Soomaali / English  en



Aniga iyo labadayda walaalo waxaan nimid Norway December 2016. Waxaan xirnayn dharka xagaaga, sababtoo ah waxaan u maleynaynay inay kulushahay Norway sida Soomaaliya. Si kastaba ha ahaatee, markii aan nimid garoonka diyaaradaha, waxaa jiray baraf. Waxaana jiray qabow, cimiladuna waa ay qaboobaayd. In kasta oo aannu dhawr boorsooyin wadanay, haddana waxaan wadanay oo keliya dharka xagaaga.

...

My two brothers and I came to Norway in December 2016. We wore summer clothes because we thought it would be as warm in Norway as it was in Somalia. However, when we arrived at the airport, it was snowing. We were cold and the weather was chilly. Although we had brought a few suitcases, they only had summer clothes in them.

Even though it was cold, I was very happy when we came to Norway. I would finally meet my mum again, whom I had not seen for six years. My mum and two of her friends met us. When we saw her, we wept with joy. We drove to the small town where Mum lives.

...

Inkasta oo ay gabow ahayd, aad ayaan ugu farxay markaan Norway nimid. Waxaan ugu dambeyntii la kulmi lahaa hooyaday markale, oo aanaan arag muddo lix sano ah. Hooyaday iyo laba saaxiibadeheed ayaa nala kulmay. Markaan aragnay iyadii ayaannu farxad la ooynay. Waxaan u sii raacnay magaalada yar ee ay hooyo ku nooshahay.





Maalmihii ugu horreeyay ee magaalada hooyo degantahay waxay ahaayeen kuwo la yaab leh. Qabow iyo baraf baa da'ay oo wax badan ma jirin. Waddooyinka ayaa gabi ahaanba faaruq ahaa. Dadka yar ee aan la kulmay waxay u muuqdeen kuwo aamusan oo aan wax saaxiibtinimo lahayn. Soomaaliya waxaa jiray dad meel walba jooga, sidaa darteed wax walba waxa ay dareemayeen si nooc kale ah halkan. Hooyaday iyo saaxiibadeed waxay na siiyeen xoogaa hadiyado ah, ka dibna waxay noo kaxaysay suuqa si aan u soo iibsanno dharka qabowga.

...

The first days in Mum's town were very strange. It was cold and snowy and there was not much to see. The streets were completely empty. The few people I met seemed cold and unfriendly. In Somalia there were people everywhere, so everything felt unfamiliar here. My mum and her friends gave us some presents, and then she took us to buy winter clothes.



Haddaan Soomaaliya joogi lahaa, waxaan filayaa inaan hadda hooyo ahaan lahaa. Laga yaabaa inaan hore u yeelan lahaa carruur badan. Haddii aan Soomaaliya joogi lahaa, ma helin fursadaha aan hadda haysto. Waxaan dareemayaa inaan nasiib leeyahay inaan ku noolaado Norway.

...

If I had stayed in Somalia, I think I would have been a mother by now. Perhaps I would already have many children. If I had been in Somalia, I would not have had the same opportunities as I have had now. I feel lucky to live in Norway.

After the Christmas holidays I joined a Norwegian course at the adult education centre. I studied there for two years before starting in an ordinary school. Now I am in my final year, and I have made many new friends. I am very sociable and enjoy meeting other people.

...

Kadib fasaxa kirismaska waxaan ku biiray koorxada Norwejiga ee xarunta waxbarashada dadka waaweyn. Waxaan halkaas ku bartay laba sano ka hor intaan bilaa bin iskool caadi ah. Hadda waxaan ku jiraa sannadkii ugu dambeeyay, waxaanan yeeshay saaxiibo badan oo cusub. Waxaan ahay qof bulshaawi ah oo waxaan ka helaa la kulanka dadka kale.



Next year I will start secondary school in the health and youth development section. In the future I want to become a youth worker. When I have finished my education, my dream is to get a permanent job. I also want to learn how to drive and get my driver's licence.

...

Sannadka soo socda waxaan bilaabi doonaa iskoolka sare ee qaybta caafimaadka iyo horumarinta dhaliinyarada. Mustaqbalka waxaan rabaa inaan noqdo shaqaale dhaliinyaro ah. Markaan dhammeeyo waxbarashada, riyadeydu waa inaan helo shaqo joogto ah. Waxa kale oo aan rabaa in aan barto darawalnimada oo aan helo shatiga darawalnimada.





Iskoolka ka dib waxaan aadaa xarun ay maamulaan dad iskaa wax u qabso ah halkaas oo aan ka helo caawinta shaqada gurigayga. Waxaan sidoo kale ku biiray koorsada harqaanka ee xarunta.

...

After school I go to a centre run by volunteers where I get help with my homework. I have also joined a sewing course at the centre.



Soomaaliya waligey iskool ma dhigan mana dhigan koorso aan ka ahayn dugsi quraan. Ma aqoonin sida wax loo akhriyo ama loo qoro. Hadda waxaan bartay sida loo qoro af-soomaali iyo af-noorwiiji, iyo maadooyin kale oo badan. Waxbarasho la'aanteed waxaan dareemay inaan qofna ahayn. Hadda waxaan dareemayaa inaan ahay qof aqoon iyo farxad leh.

...

In Somalia I never went to school or did any courses except Quran school. I did not know how to read or write. Now I have learned how to write in both Somali and Norwegian, and many other subjects. Without education I felt I was nobody. Now I feel knowledgeable and happy.